# Lån av CPAP, Hjälpmedelscentrum

Waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado waxaa laga amaahda Maamulka Gobolka Västmanland. Waa mamnuuc in aaladda CPAP qof kale la siiyo, waa qalab shaqsiyeed oo qofka gaar ahaan lagu tijaabiyay oona loo fasaxay in u isticmaalo.

Markii goobta aad ku tijaabinayso Aaladda cadaadiska marin-haweedka ee joogtada ah CPAP waxad mar qura bixin doontaa 500 karoon. Macanaha kharashka ma ahan inaad aaladda iibsatay, milkiyeha aaladda weli waxaa weeyaan maamulka gobolka.

**Daryeel iyo dayactir**
Aaladda CPAP waa in loo daryeela hab waafaqsan dardaaranka lagu siiyay iyo buugga tilmaan-bixinta ee la socda. Waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado waa in loo kaydsho hab sugan oona waxyeelid laga ilaaliyo.

Lacag la`aan ayaa aaladda lagu dayactirayaa. Haddii aaladda ay cillad yeelato ama u baahan tahay alaabooyinka cusub oo mar qura la isticmaalo, la xiriir Xarunta *Hjälpmedelscentrum* adigoo kala xiriira barta internetka 1177.se ama khadka taleefanka 021-17 30 48.

Su`aallaha xiriirka la leh daryeelkaaga, kala xiriir Rugta caafimaadka sambabada *Lungmottagningen* adigoo kala xiriira barta internetka 1177.se ama khadka taleefanka 021-17 32 50.

**Haddii aaladda wax ku dhacaan**
Haddii aaladda CPAP la xado waa in islamarkiiba booliska iyo Xarunta *Hjälpmedelscentrum* la wargeliyaa. Haddii xatooyada aaladda ay xiriir la leedahay socdaal, xaaladdaas waa in xitaa shirkadda gaadiidka la wargeliyaa.

Haddii taxadar-darro ama aaladda CPAP ka lunto waxaa waajib kugu ah inaad bixiso qiimaheeda. Sidaas darteed, hubso inaad caymiska guriga leedahay.

**Kadib markii daryeelka la soo gabgabeeyo**
Haddii qofka aaladda ku qoray oo uu daryeeka soo gabagabeeyo, ama haddii aadan u baahnayn inaad aaladda CPAP isticmaasho waa inaad sida ugu dhaqsida badan dib ugu soo celisaa Rugta caafimaadka sambabada, Xarunta waxyaalaha/farsamada caawinaad ahaan la adeegsado ama rugta daryeel-caafimaadeedka aad ka tirsan tahay. Haddii aadan dib u soo celin waa inaad bixiso qiimaha aaladda CPAP.

***Waxaa lay siiyay warbixinta kor ku qoran***

……………………………………………………………………….
Saxiix

……………………………………………………………………….
Qor saddexda magac